# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Golaha Wakiiladda



## WARBIXINTA

## Wax-qabadka Sannadka 1aad ee Golaha Wakiillada 5aad ee Somaliland

*August 2021 illaa August 2022*

SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES © 2022

*Near Sha'ab Area, In-front of The Presidential Place*

*www.somalilandparliament.com*
*hor@somalilandparliament.net*

HARGEISA-SOMALILAND

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**
**GOLAHA WAKIILADDA**

**********************************************

# WARBIXINTA WAXQABADKA SANNADKA KOWAAD EE GOLAHA WAKIILLADA 5AAD EE SOMALILAND

***August 2021 illaa August 2022***

**August 2022**

## *HORDHAC.*

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation).

Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021 waa Golihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho toos ah, waana Golihii 5$^{aad}$ (afraad) oo ay ka horeeyeen afar gole, saddexda gole ee kale waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay shacabku si toos ah u soo doorto September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodoodu waa Xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta 1$^{aad}$ ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Illaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39$^{aad}$, Qodobka 53$^{aad}$, Qodobka 54$^{aad}$ iyo Qodobka 55$^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 Guddi Sida ku cad Xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu wuxuu yeeshay saddex kal-fadhi tan iyo markii ay xilka la wareegeen 03 August 2021, kal-fadhiyadaas oo ahaa kal-fadhigii 1aad, 2aad iyo 3aad. Hadaba warbixintani waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee mudaddii sannadka ahayd ee uu joogay.

## GOLIHII 5AAD EE WAKIILLADDA SOMALILAND

Golahan Wakiilladu waa Golihii shanaad ee Wakiillada Somaliland yeelato laga soo bilaabo **18 may 1991kii** markii gooni isug taageeda la soo noqotay, waana Golihii labaad ee si toos ah shacabku u soo doorto, iyadoo Golihii ka horeeyay 2005tii si toos ah shacabku u soo doorteen, halka golahana lagu soo doortay doorashadii isku sidkanayd ee dalka ka dhacday **31 May 2021**. Doorashadaas isku sidkanayd oo ahayd doorasho shacabka Somaliland ay ku soo doorteen Golaha Wakiillada iyo Golayaasha Deegaanka Degmooyinka dalka, doorashadan oo ay isu-diwaangaliyeen **1,065,847** cod-bixiye, kana dhacday **2,709** goob-doorasho oo ka tirsan **23** degmo doorasho ee dalka, iyadoo musharixiinta ku tartamay tiradoodu **246** musharax oo u sharaxnaa Golaha Wakiilada iyo **552** musharax oo u sharaxnaa Golayaasha Deegaanka, kana kala tartamay saddexda xisbi qaran ee Kulmiye, Waddani iyo UCID.




Madaxweynaha Somaliland iyo Shacabka Somaliland u taagan inay Codkooda dhiibraan 31 May 2021

Doorahadani oo ay goob-joog ahaayeen beesha caalamka iyo ururada arrimaha bulshada ee dalka, waxa doorashadan lagu tilmaamay tii ugu wanaagsanayd uguna xasiloonida badnayd ee aan wax muran iyo is-maan dhaaf ahi ka iman. Natiijada hordhaca ahayd waxay komishanka Doorashooyinka Qaranku ku dhawaaqeen mudadii u dhaxaysay **02 illaa 06 June 2021** oo dhamaan degmooyinka iyo Gobolada dalka kaga dhawaaqeen, halka Maxkamada sare ay **07 July 2021** ay ansixisay natiijada Doorashada iyadoo ku raacday uguna dhawaaqday sidii Komishanka Doorashooyinku natiijada hordhaca ugu shaaciyeen, waxaana ku soo baxay 82 Mudane oo Golaha Wakiillada inay xubno ka noqdaan ku guulaystay, taas oo saddexda xisbi qaran u kala heleen Xisbiga Waddani oo ugu badnaa uu helay **33 Mudane,** halka Xisbi Xaakimka Kulmiye uu ka helay **30 Mudane**, Xisbiga UCID isna uu ka helay **21 Mudane.**

## FADHIGII UGU HOREEYAY EE DOORASHADII SHIR-GUDOONKA

Fadhigan ugu horeeya wuxuu dhacay **03 August 2021,** waxa fadhigaas ka soo xaadiray **81 Mudane** oo ka tirsan 82 Mudane ee Goluhu ka kooban yahay, halka 1 Mudane uu fadhigaas ka maqnaa, fadhiga $1^{aad}$ ee Golaha Wakiillada wuxuu Gudoomiyaha Maxkamada sare ku dhaariyay Mudanayaasha cusub isagoo gobol-gobol loo dhaariyay  sida Qodobka $44^{aad}$ ee dastuurku dhigayo, sidoo kale waxay isla fadhigaas ugu horeeya lagu dooranayaa Shir-gudoonka Golaha oo kala ah Gudoomiye, Gudoomiye ku-xigeen $1^{aad}$ iyo Gudoomiye ku-xigeen $2^{aad}$.





*Mudanyaasha Gobolka Tog-dheer oo la dhaarinayo Fadhigii kowaad ee Golaha Wakiillada Cusub*

Dhaarinta ka dib, loollan dheer ka dib waxa si rasmiya fadhiga looga shaaciyay Musharixiinta Shir-gudoonka oo tiradoodu ahayd 6 Mudane, kuwaas Gudoomiyaha ay u tartameen 2 Mdune oo kala ah Md. C/risaaq Khaliif Axmed iyo Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon), halka Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ay u tartameen Md. Siciid Mire Faarax (Giire) iyo Md. Cumar Jaamac Faarax, Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ay tartameen Md. Cali Xaamud Jibriil iyo Md. C/naasiir Yuusuf Cismaan (Qodax).



*Mudanyaasha Cusub ee Golaha Wakiillada oo u codaynaya Doorashada Shir-gudoonka Golaha.*

Doorashada Shir-gudoonka oo uu Gudoomiyaha Maxkamada sare gudoominayay, waxay mudanyaasha Goluhu cod gacan taaga ugu kala codeeyay lixda Musharax ee saddexdaas xil midkiiba ay labada mudane u tartameeyn, waxayna kala heleen:-

**Xillka Gudoomiyaha**

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Md. C/risaaq Khaliif Axmed | 42 Cod |
| 2. | Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon) | 39 Cod |

**Xillka Gudoomiye ku-xigeenka 1aad**

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Md. Siciid Mire Faarax (Giire) | 41 Cod |
| 2. | Md. Cumar Jaamac Faarax | 40 Cod |

**Xillka Gudoomiye ku-xigeenka 2aad**

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Md. Cali Xaamud Jibriil | 43 Cod |
| 2. | Md. C/naasiir Yuusuf Cismaan (Qodax). | 38 Cod |

Waxaana sidaas ugu guulaystay Xilalka Shir-gudoonka saddexda Mudane ee kala ah:-

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Md. C/risaaq Khaliif Axmed | Gudoomiyaha Golaha Wakiillada |
| 2. | Md. Siciid Mire Faarax (Giire) | Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiillada |
| 3. | Md. Cali Xaamud Jibriil | Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiillada |

## *XIL-WAREEJINTII SHIR-GUDOONKA GOLAHA*

**07 August 2021** Munaasibad xil wareejin ah oo ay ka soo qayb galeen Madaxd Qaran oo ay ka mid yihiin Shir-gudoonkii Hore, Shir gudoonka Cusub ee Goluhu doortay, Gudoomiyaha Maxkamada Sare, Wasiirka Xidhiidhka Golayaasha, Wasiirka Horumairnta Maaliyada, Gudoomiyaha Xisbiga Waddani, Gudoomiyaha Xisbiga UCID, Gudoomiye kuxigeenka 2aad ee Xisbiga KULMIYE, Maayarka Caasimada, qaar ka mida Madaxda xisbiyada, xildhibaanadii Hore iyo Xildhibaanada Cusub ayay xilka kula wareegeen Shirgudoonka Cusub ee Golaha Cusubi doorteen 03 Aug 2021.

Munaasibadan Xil-wareejinta ayuu Shir-gudoonkii hore oo ay ka joogeen Gudoomiyhii Md. Baashe Maxamed Faarax iyo ku-xigeenkii 1aad Md. Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle ayay si rasmiya xilkii shir-gudoonka Golaha Wakiilada ugu wareejiyeen Gudoonka cusub, iyadoo Xil-wareeintaas oo madaxdii ka soo qayb-gashay hadalo kala duwan ka jeediyeen waxay Shir-gudoonkii hore ku amaaneen xilkii ay qaranka u soo hayeen iyo wax-qabadkoodii waxayna shir-gudoonka cusub ugu duceeyeen in Illaahay Xilka Qaranka iyo gudoomiinta Golaha Cusub u fududeeyo.




*Gudoonkii hore ee Golaha oo Xilka ku wareejiyay Gudoonka Cusub*

Gudoomiyihii hore iyo Gudoomiyaha cusub waxay kala saxeexdeen dukumenti lagu soo koobay hantid guurtada ah iyo tan ma guurtada ah ee Golaha Wakiilada, tiradoodda iyo heerka ay marayaan, waxaana ka mid ahaa waxyaabaha ay wareejiyeen Buuga Wax-qabadkii mudaddii Golihii hore joogay, 11 Buug yare oo ka kooban Siyaadaha hab-maamul ee Golaha, hab-raacyada shaqo gudasho, xeerarka Golaha hor yaal iyo heerarkay kala marayaan, shaqaalaha Golaha iyo tiradoodda iyo sidoo kale qalabka iyo dhismayaasha Goluhu leeyahay.

Intii ay socotay Munaasibadaasi waxa hadalo ka jeediyay Madaxdii kala duwanayd ee ka soo qayb-gashay waxaana ka mid ahaa Gudoomiyaha Xisbiga mucaaradka Md. C/raxman Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Xisbiga UCID Faysal Cali Waraabe, Maayirka Caasimada Hargeysa Md. C/kariim Axmed Mooge, Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Xisbiga Kulmiye Axmed Cabdi Dheere, Wasiirkii hore ee Maaliyada ahaana Gudoomiye ku-xigeenkii Golaha Wakiillada Md. C/casiis Maxamed Samaale, Xildhibaan Axmed Cabdi Kijaandhe oo Golihii hore ka mid ahaa, Gudoomiyaha Xilka wareejinayay Md. Baashe Maxamed Faarax, Gudoomiye ku-xigeenkii hore Md. Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle, Waxaana Munaasibadaas shahaado sharafyo lagu siiyaya Shir-gudoonkii hore, Gudoomiyaha Maxkamada sare, Gudoomiyaha Golaha Guurtida, Gudoomiyayaasha Xisbiyada Qaranka iyo Xoghayaha Guud ee Golaha.

Ugu dambeyn, Gudoomiyaha cusub Md. C/risaaq Axmed Khaliif wuxuu gudoonkii ka horeeyay ugu mahad-naqay xil-wareejinta iyo siday u soo agaasimeen, markii xaflada xil-wareejintu dhamaataynan waxay labada Gudoon si rasmiya uga kala wareegeen Xafiiska Gudoonka Golaha.

## *WAX-QABADKAKAL- FADHIYADII GOLAHA*

***Wax-qabadkA Kal-fadhigii 1$^{aa}$, 2$^{aad}$ iyo 3$^{aad}$ ee Golaha 5$^{aad}$ ee Wakiillada Somaliland***

| | |
|---|---|
| 1. Fadhiyadii Golaweynaha ee Kal-fadhigii 1$^{aad}$ | 25 Fadhi |
| **2.** Fadhiyadii Golaweynaha ee Kal-fadhigii 2$^{aad}$ | 21 Fadhi |
| **3.** Fadhiyadii Golaweynaha ee Kal-fadhigii 2$^{aad}$ | 23 Fadhi |
| **4.** Kulamadii Gudiyada Golaha Wakiiladu yeesheeyn | 95 Kulan |
| **5.** Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada | 164 Fadhi/kulan |

### Warbixinadii Golewaynaha laga hor akhirayay

| **Taariikhda** | **Nooca Warbixinta** | **Cidii akhridey** |
|---|---|---|
| 17 August | Warbixinta Gudidda Gaar ahayd ee Xeer-hoosaadka | Md. C/laahi Muuse Cabdi Gudoomiyihii Gudida gaar ah. |
| 01 September | Warbixintii Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha ee Xeerka Shaqaalaha Dawlada | Gudooomiyihii H. Shaqaalaha Farxaan Aadan Haybe |
| 06 September | Warbixinta Wasiirka Wasaarada H. Maaliyada ee Xeerarka Maamulka Maaliyada iyo Xeerka Dhakhliga | Wasiirka W. H. Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire |
| 21 September | Warbixinta Wasiirka Wasaarada Shaqo-galinta Arrimaha Bulshada iyo Qoyska ee Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta | Wasiirka W. Shaqo-galinta, Arr. Bulshada iyo Qoyska Md. Mustafe Maxamed Cali |
| 11 December 2021 | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 1$^{aad}$ | Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee Golaha |
| 11 December 2021 | Warbixinta Gudidda Joogta iyo Anshaxa | Md. Axmed Cabdi Casoowe Gud. Ku-xigeenka Gud. Joogtada |
| 12 December 2021 | Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha | Md. Axmed Maxamed Hurre Gud. Ku-xigeenka Gudidda Gudidda Dhaqaalaha |
| 12 December 2021 | Warbixinta Gudidda Deegaanka | Md. Mubaarik Muuse Ismaciil Gud. Gudidda Deegaanka |
| 12 December 2021 | Warbixinta Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada | Md. Yaxye Arraarse Gud. Gudidda Garsoorka iyo Cadaaladda |
| 27 December 2021 | Warbixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022. | Dr. Sacad Cali Shire Wasiirka W. Horumarinta Maaliyada |
| 02 January 2022 | Warbixinta Kormeerada Gobolada Dalka ee Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka. | Md. Mustafe Axmed C/laahi Gud. Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka |

| | | |
|---|---|---|
| 08 January 2022 | Warbixinta Xisaab XIdhka Miisaaniyadii 2020kii ee Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka. | Md. Axmed Cabdi Ibraahim Xubin Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka |
| 15 January 2022 | Warbixinta Gudidda Dhaqaaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Odoroska Miisaaniayda Qaranka sanadka 2022ka | Md. C/rashiid Gud. Gudidda Dhaqaalaha |
| 16 January 2022 | Waxbixinta Guddida Arrimaha Gudaha ee Xeerka ka-hortaga iyo xakamaynta ka-ganacsiga iyo Tahriibinta Dadka. | Md. Axmed Nuur Guruuje Gud. Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 29 January 2022 | Warbixinta Guddida Cadaalada ee Xeerka Xaquuqda Caruurta. | Md. Yaxye C. Amiin Gud. Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka |
| 05 February 2022 | Warbixinta Guddida Dhaqaalaha ee Xeerka Caymiska shirkadaha. | Md. C/rashiid Gudoomiyaha Gudidda Dhaqaaalaha |
| 15 May 2022 | Warbixinta Kal-fadhiga 2aad ee Gudidda Joogta iyo Anshaxa | Md. Axmed Cabdi Casoowe Gud. Ku-xigeenka Gud. Joogtada |
| 12 June 2022 | Warbixinta Guddida Dhaqaalaha ee Wax-ka-beddelka Xeerka dakhliga Cashuuraha Bariga. | Md. Axmed Maxmamed Hurre (Barkhad) Gud. Ku-xigeenka Gud. Joogtada |

## Mashaariicdii Sharci Goluhu ka doodday

| N | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda |
|---|---|---|
| 1. | Xeer-hoodaadka Golaha | 21-22 October |
| 2. | Xeer Aassaaska Hay'adda Shaqaalaha iyo Shaqaalaha Dawlada | 04-05-11 September |
| 3. | Xeerka Xakameynta ka Ganacsiga iyo Tahriibka Dadka | 22 iyo 30/01/ 2022 |
| 4. | Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruuraha | 29 illaa 30/02/2022 |

## Xeerarka Goluhu Ansixiyay ee Guurtida u gudbay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeer-hoodaadka Golaha Wakiillada | 25/08/2021 | Gud. G/Wakiillada |
| 2. | Xeer Aass-aaska Hay'adda Shaqaalaha iyo Shaqaalaha Dawlada | 06/09/2021 | G. Guurtida |
| 3. | Waxka-beddel Qodobka 10 (1aad iyo 5aad) ee tilmaamay Darajooyjinka Degmooyinka Caynaba, Balli-gubadle iyo Taleex iyo Kaabis ah Qodobka 12aad Ee Xeerka Is-maamulka Gobollada iyo Degmooyinka Xeer.Lr. 23/2019. | 02/10/2021 | G. Guurtida |
| 4. | Xeerka Xakameynta ka Ganacsiga iyo Tahriibka Dadka | 24/01/2022 | Golaha Guurtida |
| 5. | Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruuraha | 01/02/2022 | Golaha Guurtida |

## Xeerarka Goluhu Ansixiyay ee Madaxweynaha u gudbay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Xisaab Xidhka Miisaaniyadii 2020kii | 11/01/2022 | Madaxweynaha |
| 2. | Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka. | 15/01/2022 | Madaxweynaha |
| 3. | Xeerka Sahminta iyo Soo saarista Shidaalka | 18/01/2022 | Madaxweynaha |
| 4. | Xeerka Shaqaalaha Dawlada | 16/02/2022 | Madaxweynaha |
| 5. | Xeerka Xakameynta ka Ganacsiga iyo Tahriibka Dadka | 05/06/2022 | Madaxweynaha |

## Masuuliyiinta Qaran ee Goluhu Su'aalaha waydiiyay

| No | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Md. Farxaan Aaadan Haybe | Gudoomiyihii Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 31/08/2021 |
| 2. | Md. Dr. Sacad Cali Shire | Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada | 27/12/2021 |
| 3. | Md. Cabdiqani Maxamuud Caateeye | Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga iyo Taliyaha Ciidanka Qaranka | 11/06/2022 |
| 4. | Md. Cumar Cali | Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaran | 19/06/2022 |
| 5. | Md. Axmed Max'ed Diiriye (Toorno) | Wasiirka Wasaarada Waxbarashada | 25/06/2022 |

## Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay

| No | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 6. | Axmed Adan Jaamac | Wasiirka Wasaarada Horumarinta Reermiyiga | 09/01/2022 |
| 7. | Cali Xasan Maxamed | Wasiirka Horumarinta Biyaha | 09/01/2022 |
| 8. | Cabdilahi Cabdiraman Aare | Wasiirka Horumarinta Maal-gashiga | 09/01/2022 |
| 9. | Cabdirisaq Xuseen Cali | Wasiirka Diinta iyo Awqaafta | 09/01/2022 |
| 10. | Cabdilahi Faarax Cabdi | Wasiirka Macdanta iyo Tamarta | 09/01/2022 |
| 11. | Rooda Jaamac Cilmi | Wasiir ku xigeenka Maaliyadda | 09/01/2022 |
| 12. | Cabdinaasir Cumar Jaamac | Wasiir ku Xigeenka Arrimaha Dibedda | 09/01/2022 |
| 13. | Cabdilaahi Xuseen Cilmi | Wasiir ku Xigeenka Arrimaha Guddaha | 09/01/2022 |
| 14. | Siciid Axmed Jibriil | Wasiir ku xigeenka Horumarinta Biyaha | 09/01/2022 |
| 15. | Cabdixakim Siciid Muuse | Wasiir ku xigeenka Waxbarshada | 09/01/2022 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 16. | Maxamed Cabdilahi Guuleed | Guddoomiyaha Guddida Qandaraasyada | 09/01/2022 |
| 17. | Khaalid Jaamac Axmed | Guddoomiyaha hay'ada Shaqaalaha Dawlada | 09/01/2022 |
| 18. | Saleban Cawad Cali Bukhaari | Guddoomiyaha Hay'adda Caymiska | 09/01/2022 |
| 19. | Cali Cabdilahi Daahir | Guddoomiyaha Banka Dhexe | 09/01/2022 |
| 20. | Aamina Xuseen Maxamuud | Guddoomiye ku xigeenka H. Shaqalaha | 09/01/2022 |
| 21. | Axmed Xasan Ibraahim | Xubin Komishanka Maamul Wanaaga ah | 10/01/2022 |
| 22. | Cabdiraxman Cali Cabdi | Wasiir Ku-xigeenka W. Warfaafinta | 10/01/2022 |
| 23. | Dr. Ciise Cabdiraxman Kayd | Wasiirka W. Arr. Dibada | 11/01/2022 |
| 24. | Cabdirisaaq Ibraahim Ataash | Wasiirka W. H. Jidadka iyo Gaadiidka | 15/01/2022 |
| 25. | Maxamed Xaaji Cismaan | Wasiirka Wasaarada Beeraha | 18/01/2022 |
| 26. | C/caziiz Maxamed Xaashi (Cago-weyne) | G/kuxigeenka Gudida Qandaraasyada Qaranka | 24/01/2022 |
| 27. | Maxamed Xasan Ismaciil | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 28. | Muxiyadii Yuusuf Ibraahim | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 29. | Aadan Geedi Qayaad | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 30. | Cabdale Ibraahim Maxamed | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 31. | Mukhtaar Cabdi Jaamac | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |
| 32. | Siciid Maxamed Cilmi | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |
| 33. | Maxamuud Axmed Obsiiye | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |
| 34. | Cabdirisaaq Ibraahim Maxamed | Wasiirka W. H. Jidadka iyo Gaadiidka | 13/06/2022 |
| 35. | Xuseen Cabdi Badhaani | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 36. | Ibraahim Aadan Cali | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 37. | Faadumo Ismaaciil Cabdi | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 38. | Cabdicasiis Xiris Warsame | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |

## Masuuliyiintii Qaran ee aan helin Codkii kalsoonida Golaha

| No | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 39. | Axmed Yuusuf Maxamed | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 40. | Muuse Xasan Yuusuf | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 41. | Axmed Cismaan Xasan | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |

## Mooshinadii Golaha la horkeenay

Jntii lagu jiray Kal-fadhigii 1aad ee Golaha Wakiillada waxa Mudanayaal kala duwan Golaha horkeeneen dhawr Mooshin oo kala duwan, mooshinadaas oo nuxurkoodu ahaa in Goluhu go'aan ka gaadho arrimaha sharci ee Mooshinadaas kala

xambaarsanaayeen, hadaba, shaxdan hoose waxaynu ku soo koobanaynaa mooshinadii Golaha la hor keenay, nuxurkoodii iyo sidoo kale kuwa ansaxay iyo kuwaa aan ansixin sharci ahaan:-

| Taariikhda | Nuxurka Mooshinka | Cidda akhriday | Taladii sharci | Ansixintii |
|---|---|---|---|---|
| 01 September | Mooshinkii ku saabsanaa in dib looga wada dooddo labada Xeer oo ka soo noqday Golaha Guurtida | Md. Mukhtaar Xassan Maydhane | Waafaqay Sharciga | Cod gacan taaga lagu ansixiyay |
| 21 September | Mooshin ku saabsan Hab-raaca Xil-gudasho ee hay'adda Caymiska iyo Fulinta Go'aanka Maxkamada sarre. | Md. C/rashiid C/laahi Muuse | Waafaqay Sharciga | Cod gacan taaga lagu ansixiyay |
| 02 October | Mooshin ku saabsan Wax ka-beddel iyo Kaabis Xeerka Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr. 23/2019 Qodobka 10aad (1aad iyo 5aad) oo tilmaamay Darajooyjinka Degmooyinka Caynaba, Balli-gubadle iyo Taleex iyo Qodobka 12aad ee Xeer.Lr. 23/2019. | Md. Axmed Jaamac Saalax | Waafaqay Sharciga | Cod gacan taaga lagu ansixiyay |
| **27/06/2022** | Mooshin ku saabsan Wax ka badalka Midaynta Cashuuraha Kastam ee Xeer Lr. 23/2019 ku jira. | Md. Jamaal Adan Diiriye. | Waafaqay Sharciga | Soconaya madaama uu yahay wax ka badal xeer |
| 22/06/2022 | Mooshin ku saabsan in aan madaxweynuhu soo celin karrin masuuliyiinta aan helin codka kal-soonigada Golaha. | Md. Axmed Khaliif | Golaha Fasax ka-galay | Kal-fadhiga dambe |
| 02 October | Mooshin Nuxurkiisu ahaa kor u qaadista darajooyinka Degmooyinka dalka qaarkood. | Md. C/naasir Qodax | Sharci ahaan Mooshinkaa si muu ansixin | Nuxur ahaan wuu buray |
| 22/06/2022 | Mooshin ku saabsan Curin Xeer cusub oo ah Xeerka Saxaafada Somaliland | Md. Barkhad Jaamac Batuun | Sharci ahaan Mooshinkaa si muu ansixin | Nuxur ahaan wuu buray |

## Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka.

Sida Ku Cad Dastuurka Qodobkiisa 55aad Odoroska Miisaaniyada Qaranka dib u eegideeda, wax ka badalkeeda iyo ansixinteeda waxa awood buuxda uu dastuurka iyo xeerarka kale ee

Maaliyadu u siiyeen Golaha Wakiillada, waxaana odoroska Miisaaniyadeedka sanadka soo diyaarisa Wasaarada Horumarinta Maaliyada, ka dibna waxa soo ansixiya Golaha Xukuumada oo iyagu Golaha Wakiillada u soo gudbiya, iyadoo marka Xukuumadu soo gudbiso ay ugu horeyn Wasaarada Horumainta Maaliyadu warbixin buuxda ka siiso Golaha, isla markaana Mudanayaasha Goluhu wuxuu su'aalo qabaan ka waydiiyaan Wasiirka iyo Masuuliyiinta Wasaarada Maaliyada.

Hadaba, Odoroska Miisaaniyad sannadeedka 2022ka waxa Golaha loo soo gudbiyay 27 December 2021, iyadoo isla Maalintaas Fadhi ka mid ah Kal-fadhigii 2aad uu Golaha Warbixin ka siiyay Wasiirka **Wasaarada H. Maaliyada Dr. Sacad Cali Shire**, isla Markaana mudanayaal tiro badani su'aalo ka waydiiyeen, Wasiirka iyo Saraakiisha kale ee Wasaaradiisuna uga jawaabeen Mudanayasha. Iyadoo intaas ka dib sida Xeer-hoosaadku dhigayo isla markaana Hab-raaca Miisaaniyada Golaha Wakiiladu uu yahay, waxa si toos ah Miisaaniyada loogu wareejiyay Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga si ay u soo lafa-gurto, ka dibna, warbixin ugu soo siiso Golewaynaha.



*Wasiirka W. Horumarinta Maaliyada iyo Saariiksha Wasaaradaas oo Golaha Warbixin ka siinaya Miisaaniyada Sanadka 2022*

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Goluhu waxay ka soo shaqaynaysay Miisaaniyada muddo laba toddobaad ah, ka dib markii ay kulamo kala duwan la soo yeelatay qaybaha kala duwan ee khusayso ama ay u aragtay inay wax ka waydiiso sida Wasaarada H. Maaliyada iyo hay'addo kale oo dawladeed iyo hay'addo gaar ahba, isla markaana la tashiyo badan iyo falanqayan balaadhan ku soo samaysay Miisaaniyada iyo qaybaha ay ka kooban tahay.

**15 January 2022** ayay Gudiddu Warbixn dheer oo aad u qiimo badan Golaha ku soo celisay, warbixintaas oo xambaarsanayd wax ka badal iyo kala wareejin madaxyo iyo madax-xigeeno Miisaaniyada ah.

Warbixintaas ka dib, wuxuu Golaha Wakiilladu isla fadhigaas gudo galaya inuu ka guto waajibaadka shaqo ee uga hadhsan Miisaaniyada, waxayna Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha Goluhu isla qaateen in Miisaaniyada lagu ansixiyo wax ka badalka iyo kaabista ay Gudidda Dhaqaaluhu soo jeedisay.

Intaas ka dib, isla fadhigaas wuxuu Goluhu Cod aqlabiyad ah ku Ansixiyay Odoroska Miisaanad Sannadeedka 2022ka oo wax ka badal aad u badan lagu sameeyay, waxayna ahayd wax ka badalkii iyo kaabistii ugu waynayd uguna badnayd ee abid Golaha Wakiilladu ku sameeyo Mashruuc Sharciyadii Miisaaniyad sannadeed ee Xukuumadu u soo gudbisay, taas oo Goluhu uu **5 Madax** oo Miisaaniyada ka mid ah uu ka jaray lacag isugaynteedu dhan tahay **59,209,082,447/= SL Shilling,** isla markaana lagu kala kordhiyay **15 Madax iyo madax-xigeen** oo kala duwan kuwaas oo uga baahi badnaa Madaxyada laga soo jaray. Ugu dambeyn Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka oo Goluhu Madaxweynaha u gudbiyay **15 January 2022,** wuxuu Madaxweynuhu dhaqangalin ku sameeyay **17 January 2022ka** oo ahayd laba cisho ka dib markii Golaha Wakiilladu Ansixiyay.

## Arrimaha kale ee Goluhu ka doodday

Mudaddii Sannadka ahayd ee Goluhu yeeshay saddexda kal-fadhi waxa kale oo uu Goluhu ka doodday arrimahan kala ah:-

1. Xaaladda Abaarta Dalka oo Goluhu ka doodday kal-fadhigii 2aad taariikhdu markay ahayd 6 February 2022, dooddaas oo Goluhu ka soo saaray Qaraar ku saabsan Abaaraha, sidoo kalena Goluhu wuxuu taakulaynta Abaaraha kaga qayb galay lacag $50 kun oo dollar ah oo Gudoomiyaha Goluhu ku wareejiyay Gudidda Abaaraha heer Qaran oo Madaxweyne ku-xigeenku Gudoomiyaha u yahay.

2. Sidoo kale Goluhu wuxuu doodda dheer oo socotay mudd 4 fadhi ah ka yeeshay Xaalada Guud ee Dalka sida Abaaraha, Doorashooyinka iyo muranka siyaasadeed ee taagan, arrimaha dibada, sixir bararka, masiibadii dabka suuqa Waaheen iyo xaaladaha kale ee dalku halku marayo, dooddaas oo ay ka qayb-galeen 32 mudane, Goluhu wax go'aan ah kama soo saarin.

## Arrimihii Gudiyada Gaarka ah loo saaray

Intii lagu jiray Kal-fadhigii 2aad ee Golaha Wakiillada 5aad, wuxuu Gudoonka Goluhu magacaabay laba Gudi oo gaar ah (ad hoc committees), kuwaas oo kala ahaa: -

1. Gudi gaar ah oo loo saaray soo diyaarinta iyo dhamaystirka Qorshaha shanta sano ee Golaha Wakiillada (HoR 5-years strategic plan 2022-2026)
2. Gudi gaar ah oo loo saaray inay ka soo shaqayso Xeerka Shirkadaha Caymiska oo Goluhu u baahday in dib loo soo naaqisho.
3. Gudidda Gaarka ah ee loo saaray Arrimaha Saxaafada iyo wada-shaqaynta Golaha Wakiilada.
4. Gudidda Gaarka ah ee loo saaray Wax ka badalka Xeerka Cashuuraha Bariga oo Golaha horyaalay.

## Xeerarka Golaha horyaal

Iyadoo Golaha Cusub Golihii hore kala wareegay dhowr xeer oo marxalado kala duwan maraya sida kuwo marxaladii qabyo-qoraalka maryaa, kuwa heerkii Gudiyada maraya iyo kuwo akhriskii $2^{aad}$ iyo akhriskii $3^{aad}$ maraya. Iyadoo Kal-fadhigii $2^{aad}$ Goluhu dhowr xeerar uu ansixiyay. Isla markaana aanu la dhamaystirin Xeerarkii ku qorshaysnaa Ajandayaashii sannadka $1^{aad}$ ee Kal-fadhiyadii $1^{aad}$, $2^{aad}$ iyo $3^{aad}$

Hadaba, Xeerarka Golaha horyaal Sannadka $2^{aad}$ ee aynu hada galnay waxa ka mid ah 5 Xeer oo heerkii Gudiyada maraya, hal Xeer oo ka soo kala noqday Golaha Guurtida, iyo laba Xeer oo Gudiyo gaar ah loo saaray, xeerarkaas oo kala ah kuwan shaxdan hoose ku muujisan.

### B. Xeerarka Qabyada ah Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| No | Magaca Xeerka | Gudidda gacanta ku heysa |
|---|---|---|
| **1.** | Xeerka Macdanta Qaranka | Gudiddda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah |
| **2.** | Xeerka Dakhliga Shidaalka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| **3.** | Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Maamulka iyo Maaraynta Maaliyada | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| **4.** | Xeerka Hay'adda Qaxootiga | Gudidda Shuruucda iyo Cadaalada |
| **5.** | Xeerka Saxaafada | Mooshin wali gudi looma dhiibin |

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruuraha | Guurtida ka soo noqday |
| 2. | Xeerka Shirkadaha Caymiska Qaranka | Gudi gaar ah loo saaray |
| 3. | Wax ka badalka Xeerka Cashuuraha Bariga | Gudi gaar ah loo saaray |

# WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
4. Gudidda Arrimaha Bulshada
5. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
6. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
7. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
8. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
9. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
10. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada oo kooban.

## Gudidda Hawlaha Golaha (Business Committee)

Gudidda Hawlaha Golaha (Business Committee) ee Golaha Wakiillada 5aad ee Somaliland oo ah Gudi ay xubno ka yihiin Saddexda Xubnood ee Shir-gudoonka, Gudoomiyayaasha Gudiyada iyo Xoghayaha Guud waxay muddaas sanadka ahayd ay yeelatay afar kulan kulan oo kala duwan, saddexdaas Kulan oo Gudiddu ka arrinsanaysay Qodobadan hoose: -

1. Kulan ay ka yeelatay Gudiddu falkii lagu dhaawacay Xildhibaan Axmed Nuur Guruuje, isla markaana qiimayn lagu samaynayay waxyaabihii u qabsoomay Golaha cusub kal-fadhigoodii 1aad.
2. Diyaarinta Qabyo-qoraalka Ajandaha Kal-fadhiga 2aad iyo Qodobada uu ka koobmayo.
3. Dib u eegista iyo soo koobida Qodobadii Dooddii Xildhibaanada ee Xaalada Abaaraha dalka ka soo baxay ama doodda laga soo ururiyay.

## Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Sida uu waajibinayo Dastuurka Qaranku iyo Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladdu waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu hawlaha Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro. Guddida Joogtadu iyo anshaxu iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah. Iyadoo ka duulaysa Xeer-hoosaadka Golaha Wakiiladda waxay kulamo la yeesheen

Masuuliyiinta Hay'addahan Dawlada ee soo socda: -

1. Guddida Doorashooyinka Qaranka 06/11/2021
2. Guddida Qaran Ee Tacliinta Sare 13/11/2021
3. Wasiirka Wasaarada Horumarinta Caafimaadka 14/11/2021
4. Maareeyaha Dekedda Berbera & Ganacsatadda dalka qayb ka mida 23/11/2021
5. Gudoomiyaha Rugta Ganacsiga 12/03/2022
6. Guddida Kaalmaha Shidaalka 14/03/2022
7. Guddida Gurmadka Abaaraha (Madaxweyne Ku Xigeen) 17/03/2022
8. Gudoomiyaha Baanka Dhexe 27/03/2022
9. Guddida Qaran Ee Tacliinta Sare 30/03/2022
10. Guddida Heer Qaran Ee Gurmadka Suuqa Waaheeen 08/05/2022
11. Kulan wada-jir ah oo ay la yeelatay Dhigeeda Gudidda Joogtada ee Golaha Guurtida.

Kulamadii Masuuliyiinta Hay'adddaha Dawlada ee Guddida Ka Baaqdey Mudaddii Sannadka ahayd waxay kala ahaayeen.

1. Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga Iyo Dalxiiska 27/11/2021
2. Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka Iyo Guriyeynta 28/03/2022
3. Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada Iyo Sayniska 02/04/2022

Sidoo kale Gudidda Joogtadu waxay ka soo shaqaysay oo Golaha u soo gudbisay:-

1. Habraaca Anshax-Marinta Mudanayaasha Golaha Wakiilada
2. Lifaaqa Xeerka Shaqaalaha Golaha Wakiilada

## Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta

Guddida Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamarta, waxa u qabsoomay intii lagu jiray kal-fadhigii 2aad iyo mudaddii fasax ee ka dambeysay, waxyaabo kala duwan.

**Kulamadii Masuuliyiinta Hay'addaha Dawlada.**

1. Maareeyaha Wakaaladda Biyaha Haragaysa **22/09/2021.**
2. Ururka Cheetah Conservation fund **23/09/2021.**
3. Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga **29/09/2021.**
4. Guddoomiyaha Hay'adda U. Aafooyinka iyo K. Raashinka Qaranka **03/02/2022**
5. Wasiirka Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo horumarinta Kalluumaysiga **26/02/2022**

**Gudiddu waxay Safaro ugu baxday Gobolada dalka qaaarkood.**

1. Gobolka Gabiley **11-12 March 2022**
2. Gobolka Awdal **13-15 March 2022**

**Masuuliyiintii Qaran ee ay ka soot ala-bixiyeen Ansixintooda.**

1. Axmed Adan Jaamac Wasiirka Horumarinta Reermiyiga **09/01/2022**
2. Cali Xasan Maxamed Wasiirka Horumarinta Biyaha **09/01/2022**

3. Cabdilahi Faarax Cabdi Wasiirka Macdanta iyo Tamarta **09/01/2022**
4. Siciid Axmed Jibriil Wasiir ku xigeenka Horumarinta Biyaha **09/01/2022**
5. Maxamed Xaaji Cismaan Wasiirka Horumarinta Beeraha **18/01/2022**

## Gudidda Daba-galka iyo Illaalinta Hantida Qaranka

Guddidu ka duulaysa Waajibaadkeeda iyo Xilkeeda Datuuriga iyo waajibaadka ku xusan Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkii August 20221 ilaa August 2022 waxay kala ahaayeen sidan: -

**Kulamadii Gudiddu la yeelatay Masuuliyiinta Hay'addaha Dawlada ee kala ah: -**

1. Hanti Dhawraha Guud **06/10/2021**
2. Xafiiska Maamulka Dib u habeynta Maaliyada (PFM) **22/09/2021**
3. Wasiirka Harumarinta Maaliyadda **12/10/2021**
4. Xubno ka mid ah Golaha Deegaanka Gabilyey **14/10/2021**
5. Maareeyaha Wakaalada Biyaha Hargeisa **12/02/2022**
6. Shirkad la yidhaa SAHAL Technology ee oo maamusha nidaamka lagu ururioy dakhliyada dalka ee cashuuraha barriga iyo kastamada **12/02/2022**
7. Maareeyaha Kaydka Haamaha Shidaalka Berbera **22/02/2022**
8. Maareeyaha Hay'adda Dekadaha Somaliland **26/02/2022**

**Masuuliyiintii Qaran ee ay ka soot ala-bixiyeen Ansixintooda**.

1. **Md. Maxamed Cabdilahi Guuleed** Guddoomiyaha Guddida Qandaraasyada Qaranka **06/01/2022**
2. **Md. Axmed Xasan Ibraahim** oo ah Xubin ka mid ah Koomiishanka Maamul-wanaaga. **06/01/2022**
3. **Mr. Cabdicasiis Cagaweyne** Guddoomiye ku xigeenka Guddida Qandaraasyada Qaranka Mr. Cabdicasiis Cagaweyne **23/1/2022**

**Xeerarkii iyo Warbixinadii kale ee Gudiddu Golewaynaha la wadaagtay.**

*1.* **02 January 2022** waxay Golaha ka jeedisay Warbixin ay ka diyaarisay Kormeero ay Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka Gobolada Dalka dalka ku tagtay.

*2.* **08 January 2022** waxay Golaha ka jeedisay Warbixin ay Gudiddu ka soo diyaarisay Xisaab Xidhka Miisaaniyada sanadka 2020kii oo Gudiddu gacanta ku haysay.

## Guddida Arimaha Bulshad

Gudidda Arrimaha Bulshada wax-yaabihii u qabsoomay mudaddii sannadka ahayd waxay kala ahaayeen: -

**Kulamadii Gudidda ee Masuuliyiinta Hay'addaha Dawlada**

1. Agaasimaha Guud ee Cubitaalka weyn ee Hargiesa (Hageisa Group Hospital) Axmed Xaji Cumar Askar & Gudoomiyaha Cusbitaalka Maxammed **22-09-2021**
2. Hay'adda Sonsof & Ururada kale ee Bulshada Rayidka ah, **25-09-2021**
3. Ururka Naafada Qaranka (Somaliland National Disability Forum) **29-09-2021**

4. Kulan ay la yeelatay Macalimiin ka Cabanayey Kuuliyadda Tababarka Macalimiinta iyo Wasaarada Waxbarshada **21-03-2022**

**Gudidda Arrimaha Bulshadu waxay safaro kala duwan ku tagtay qaar ka mid ah Gobolada dalka.**

1. Gobolka Gabiley **26/03/2022**
2. Gobolka Awdal **27-03-2022**
3. Gobolka Sellal **29-03-2022**

**Masuuliyiintii Qaran ee ay ka soot ala-bixiyeen Ansixintooda.**

6. Khaalid Jaamac Axmed Gudoomiyaha Hay'adda Shaqalaha Dawlada **09/01/2022**
7. Aamina Xuseen Maxamuud Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Shaqaalaha **09/01/2022**
8. Cabdixakim Siciid Muuse Wasiir ku-xigeenka W. Waxbarashada **09/01/2022**
9. Cabdiraxman Cali Cabdi Wasiir ku-xigeenka W. Warfaafinta **10/01/2022**

## Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Shaqooyinka iyo wax-qabadkii Gudidda Garsoorka, Cadaaladda, Dastuurka iyo Xuquuqal Insaanka mudadii Sannadkii Golaha Cusubi joogay wax-qabadkeedii waxay kala ahaayeen sidan soo socota.

**Kulamadii Gudiddu la yeelatay Masuuliyiinta Haya'ddaha**

1. Taliyaha Guud ee Ciidanka Asluubta Somaliland **25/09/2021**
2. Komishanka Xuquuqal Aadamaha qaranka **13/02/22**
3. Gudoomiyaha Ha'aydda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha **16/04/22**

**Kormeeradii iyo Safaradii Gobolada ay Gudiddu ku tagtay.**

1. Gobolka Togdheer **13/11/2021**
2. Gobolka Saaxil **12/10/2021**

**Xeerarkii ay Gudiddu Golewaynaha soo gudbisay.**

1. Xeerka Illaalinta Xuquuqda Caruurta **29/01/2022**

**Kulamo hawl-leedyadii Gudiddu Dadwaynaha u qabatay.**

1. kulamo hawleed (Workshops} lagu gorfaynaayey Caqabadaha Warbaahinta Somaliland iyo Xeerka Saaxafada oo ka kala dhacay Hargysa iyo Burco **18/10/2021**
2. kulan hawl-leed lagu gorfaynayay Xeerka Qaxootiga **16-17/06/2022**

## Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Guddida dhaqaaluhu iyaga oo Gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodaha uu qeexay Xeer hoosaadka Golaha Wakiilada, waxay kulamo kalan duwan la yeesheen la yeesheen Masuuliyiin ka tirsan Xukuumada iyaga oo ka waraysanaya xaalada Dhaqaale ee

dalka, waxqabadyadii ay sameeyeen intii ay xilka u hayeen Xukuumada iyo wixii ay ku soo kordhiyeen Xukuumada iyo Dalkaba, Masuuliyiinta Gudiddu la kulantay mudadda Sanadka ahayd waxay kala ahaayeen:-

1. **26-09-2021** Wasiirka W. Horumarinta Maaliyada iyo Saraakiisha Wasaaradiisa
2. **27-09-2021 Wasiirka** Wasaarada Ganacsiga iyo Warshadaha
3. **25-09-2021** Gudoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka
4. **27-09-2021** Gudoomiyaha iyo Masuuliyiinta Rugta Ganacsiga Somaliland
5. **27/09/2021** Guddida Qandaraasyada Qaranka
6. **25-12-2021** Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada
7. **25-12-2021** Wasiirka W. Horumarinta Maaliyada iyo Saraakiisha Wasaaradiisa

**Mashaariicda Sharci ee Gudiddu Golaha u soo gudbisay**

1. **17-18**/12/**2021** Guddida dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay kulan howleed u qabatay Mashruuca Sharciga Shirkadaha Caymiska.
2. **15-01-2022** Waxay Gudiddu Golaha u soo gudbisay **Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka**
3. **05-02-2022** Waxay Gudiddu Golaha u soo gudbisay **Xeerka Shirkadaha Caymiska**
4. **--------------** Waxay Gudiddu Golaha u soo gudbisay **Wax ka badalka Xeerka**

**Kulamo hawl-leedyadii Gudiddu Dadwaynaha u qabatay.**

5. **17-18**/12/**2021** Guddida dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay kulan howleed u qabatay Mashruuca Sharciga Shirkadaha Caymiska.

**Kormeeradii iyo Safaradii Gobolada ay Gudiddu ku tagtay.**

1. **31-10-2021** ilaa **4-11-2021** waxay Guddidu u amba baxday Gobolada Tog-dheer, Saaxil, Awdal iyo Gabilay, iyadoo soo kormeertay Ilaha Dakhliga ee Dalka.

**Masuuliyiintii Qaran ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay**.

1. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cali Cabdilahi Daahir** Guddoomiyaha Baanka Dhexe.
2. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Marwo. Rooda Jaamac Cilmi** Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Horumarinta Maaliyada
3. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Saleban Cawad Cali Bukhaari** Gudoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka

## Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca

Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca wax-yaabihii u qabsoomay mudaddii sannadka ahayd waxay kala ahaayeen: -

**Kulamadii Gudidda ee Masuuliyiinta Hay'addaha Dawlada**

- **25/01/2022** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca, Amniga iyo Nabad-galyada ee Golaha Wakiilladu waxay kulan Xog-waraysi ah la yeelatay Gudoomiyaha Golaha Deegaanka Hargeisa Md. Cabdikariin Axmed Mooge
- **27/2/20222** Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Taliyaha Ciidanka Laanta Socdaaalka.
- **01/03/2022**Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Dalada Ururada aan Dawliga ahayn ee SONSOF.
- **22-03-2022** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabad-Galyadu waxay Xafiiskeeda kulan kula yeelatay u qaabilsanaha UK ee Somaliland.
- **16/4/2022** Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Maayar ku-xigeenka Caasimada Hargeysa iyo Xoghaya fulinta D/hoose ee Hargeysa.
- **21/05/2022** Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay kulan la yeelatay Xubnaha Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Asxaabta Siyaasadda.
- **16/06/2022** Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay kulan la yeelatay Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

**Kormeeradii iyo Safaradii Gobolada ay Gudiddu ku tagtay.**

1. **29-03-2022** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabad-Galyadu waxay ssafar ugu baxday Goboalka Saaxil.
2. **13/3/2022** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabad-Galyadu waxay ssafar ugu baxday Goboalka Tog-dheer.
3. **15/03/202** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabad-Galyadu waxay safar kormeer shaqo ku tagtay Degmada Shiikh ee Gobolka Saaxil.

**Xeerarkii ay Gudiddu Golewaynaha soo gudbisay.**

1. **16-01-2022** Gudidda Arrimaha Guduhu waxay Golewaynaha u soo gudbisay Xeerka ka-hortaga iyo xakamaynta ka-ganacsiga iyo Tahriibinta Dadka.

**Masuuliyiintii Qaran ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay**.

4. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cabdilaahi Xuseen Cilmi** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Gudaha
5. **06/06/2022** waxay ka soo talo-bixisay Xubin Ka tirsan Xubnaha Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Asxaabta Siyaasadda **Md. Siciid Maxamed Cilmi**
6. **06/06/2022** waxay ka soo talo-bixisay 7da Xubnood Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Asxaabta Siyaasadda.

7. **06/06/2022** waxay ka soo talo-bixisay **7da Xubnood ee** Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

## Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska.

Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska wax-yaabihii u qabsoomay mudaddii sannadka ahayd waxay kala ahaayeen: -

**Kulamadii Gudidda ee Masuuliyiinta Hay'addaha Dawlada**

- **30/11/2021** Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska waxay kulan la yeelatay Wasiirka Diinta iyo Aw-qaafta.
- **30/11/2021** Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska oo ay waheliyaan xubno Gudidda Dhaqaalaha ka mid ahi waxay kulan ujeedaddiisu ahayd Xeerka Shirkadaha Caymiska la yeesheen qaar ka mid ah Culimada dalka.
- **01/01/20221** Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska waxay kulan la yeelatay Gudidda Wanaag farista iyo Xumaan reebista
- **06/01/20221** Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska waxay kulan la yeelatay Wasiirka Diinta iyo Aw-qaafta.

**Masuuliyiintii Qaran ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay**.

8. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cabdirisaq Xuseen Cali (Al-baani)** Wasiirka Wasaarada Diinta Aw-qaafta

## Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga

Guddidu Arrimaha Guduhu mudaddii sanadka ahayd waxay safaro dhawr ah ugu baxday dalka dibadiisa, iyadoo sidoo kale kulamo iyo ka soot ala-bixin la sameeyay qaar ka mid ah Masuuliyiinta Qaranka.

**Safaradii Gudiddu ugu baxday dalka dibadiisa.**

1. **24/10/2021** waxay safar ugu baxday Dalka Kenya.
2. **04/11/2021** Waxay Safar ugu baxday Dalka Finland
3. **04/11/2021** Waxay sidoo kale xubno Gudidda ka mid ahi Safar ku tageen Dalka Sweden.

**Kulamadii Gudidda ee Masuuliyiinta Hay'addaha Dawlada**

- **08/02/2022** Guddida Arrimaha Dibadu waxay kulan Xog-waraysi ah la yeelatay Wasiirka Horumarinta Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradaas.
- **06/01/2022** Guddida Arrimaha Dibadu waxay kulan Xog-waraysi ah la yeelatay Wasiirka Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
- **07/01/2022** Guddida Arrimaha Dibadu waxay kulan Xog-waraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha

**Masuuliyiintii Qaran ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay**.

1. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cabdilahi Cabdiraman Aare** Wasiirka Horumarinta Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha

2. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cabdinaasir Cumar Jaamac** Wasiir-ku-Xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
3. **11/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Dr. Ciise Cabdiraxman Kayd** Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

## Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada

Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Technologyada wax-yaabihii u qabsoomay mudaddii sannadka ahayd waxay kala ahaayeen: -

**Kulamadii iyo Kormeeradii Gudidda ee Masuuliyiinta iyo Xurumaha Hay'addaha Dawlada**

- **-------/2021** Guddida Hawlaha Guud waxay kulan la yeelatay Guddoomiyaha Guddida Qandaraasyadu **Nuux Maxamed Xuseen**
- **09/04//2021** Guddida Hawlaha Guud waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Hawlaha guud, dhulka & guryeynta JSL, Mudane Cabdilaahi Abokor Cismaan.
- **06/04//2021** waxa ay Guddida Hawlaha Guud kormeer ku tageen suuqa waaheen oo dab ka kacay 04 April ku shufbeelay.
- **11**/04/**2022**, waxay Gudidda Hawlaha Guud ay kormeer ku tagtay Taliska Ciidanka Dab-Damiska JSL.

**Masuuliyiintii Qaran ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay**.

1. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cabdirisaaq Ibraahim Ataash** Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka.
2. **13/06/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cabdirisaaq Ibraahim Maxamed Faarax** Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka.

## HORUMARINTA DHISMAYAASHA IYO XAFIISYADA GOLAHA

Tan iyo markii Golaha cubus ee la soo doortay 31 May 2021 oo la wareegay Shaqada Golaha Wakiillada 07 August 2021, Shir-gudoonka cusub oo ka duulaya sidii Golaha cusub waajibaadkiisa shaqo ugu gudban lahaa si wanaagsan oo wax ku-ool ah. Sidaa darteed, mudadii Goluhu joogay waxa lagu guulaystay dhowr arrimood oo kala ah: -

1. *In dib u habayn iyo Casriyayn lagu sameeyay hoolka Fadhiyada Golewaynaha.*
2. *In dib u habeyn lagu sameeyay Xafiisyada Gudiyadda qaarkood.*
3. *In dhisme hal dabaq ah lagu darro qaybta laybareeriga Golaha*
4. *In Goluhu si ku meel-gaadh ah u kiraystay Guriga Golaha ka dambeeya.*

### ➢ Dib u habeyn iyo Casriyay lagu sameeyay hoolka Fadhiyada: -

Waxa dib u habayn, casriyayn iyo qurxin lagu sameeyay Xarunta Fadhiyada Golewaynaha, taas oo lagu sameeyay casriyayn iyo qurxin wax wayn ka badashay muuqaalkii iyo bilicdii Madasha Fadhiyada Golaha, taas oo ka dhigtay inuu Goluhu yeesho xarun la mid kuwa xarumaha Baarlamaanada dalalka dimuqraadiga ah oo bilicsan, waxa la badalay habkii fadhiga Golaha isla markaana la balaadhiyay Fadhiyadii Xildhibaanada iyo fakaagyada u dhexeeya.





*Hoolkii hore ee (Chamber) Fadhiyada Golaha markii hore siduu ahaa*

Sidoo kale waxa la qurxiyay dhinacyada iyo saqabka oo lagu xidhay qalab casriya oo bilicsan, waxa la badalay goobtii Shir-gudoonka ee hoolka oo Iyana balaadhin iyo qurxin lagu sameeyay. Taasi waxay Golihii ka dhigtay mid soo jiita indhaha bulshada iyo caalamkaba oo muuqaal wanaagsan iyo madal qurxoon, iyadoo laga dheehanayo in Golaha cusub diyaar u yahay inuu waajibaadkiisa shaqo u guto sida ugu haboon ee ugu wanaagsan.

Waxa kale oo la kala xidhay qaybta Mudanyaasha ee Fadhiga iyo qaybta dadweynaha ka soo qayb-gala Fadhiyada ee martida ah halkay fadhiisan jireen oo lagu kala xidhay quraarad, taas oo dadweynuhu iyagoo halka loogu talla-galay fadhiyaan ay si fiican u arkayaan Mudanayaasha iyo hawlaha Golaha ka socda.



*Hoolkii (Chamber) Fadhiyada Golaha oo dib u habayn iyo Casriyayn lagu sameeyay*

- **Dhisme hal dabaq ah oo qaybta laybareeriga Golaha lagu kordhinayo.**

Talaabada labaad, waxa qandaraas lagu bixiyay dhisme hal dabaq ah la saarayo guriga laybareeriga Golaha oo hal dabaq ah, taas dhismahaas oo la bilaabay markii Goluhu galay fasaxa kal-fadhiga 1aad ee bishii October Dhimahas halka dabaq ah oo laga dhigayo hool wayn oo shirarka ah iyo dhowr xafiis, waxaana si hab-sami ah u socda, kaas oo dhowaan soo gaba-gaboobi doona isla markaana fududayn doona in Goluhu yeesho hool shirar oo casriya iyo xafiisyo kale oo Golaha u soo kordha.

- **Golaha oo si ku meel-gaadh ah u kiraystay Dhismaha Golaha ka dambeeya.**

Si Goluhu u helo xafiisyo iyo goobo uu ku qabsado waajibaadadiisa shaqo isla markaana qaybaha kala duwan ee aan xafiisyada haysan loogu helo xafiisyo ay ku shaqeeyaan, wuxuu Goluhu si ku meel-gaadh ah u kiraystay aqalka wayn ee Golaha ka dambeeya, kaas oo Gudiyada qaar ka mid ah, xafiisyada garyaqaanada iyo barkin gawaadhida la dhigto u noqon doona Mudanayaasha iyo guud ahaan Golaha, sidoo kale, Mudanayaasha iyo hawl-wadeenada Goluhu waxay ka helayaanhbarxad ay gawaadhida dhigtaan (parking) madaama uu Goluhu cidhiidhi yahay, isla markaana aanu hore u jirn barxad gawaadhida la dhigto.

## AQOON-KORODHSIYADII LOO QABTAY MUDANYAASHA CUSUB

Sida aynu ka wada war-qarbno, 31st May 2021 ayaa dadweynaha Somaliland u codeeyeen labo doorasho oo isku sidkanaa, waa doorashada Golaha Wakiilada iyo Doorashada Goleyaasha Deegaanada ee Degmooyinka Dalka. Doorashada G.W. waxay dadweynuhu ku doorteen 82 mudane oo dhamaantood cusub oo matali doonaa dadweynaha Somaliland shanto sano ee soo socota, kuwaasi oo leh awooda, sharci-samaynta, matalaaada dadkweynaha, iyo la xisaabtanka waaxda fulinta.

Haddaba, si shaqada iyo gudashada waajibaadka Mudanayaashu ay u noqoto mid hufan oo habsami leh, waxaa Golaha Wakiilada oo taageero farsamo iyo dhaqaaleba ka helaya UNDP, uu u qabtey tababar aqoon korodhsi mudanaasha Golaha taariikhdu markay ahayd **07th -09th September 2021**. Tababarkan oo socdey mudo sadex cisho ah xildhibaanadu waxay ku barteen casharo la xidhiidha habka iyo hanaanka shaqo ee Golaha Wakiilada.



*Qayb ka mid ah Mudanyaaasha Golaha Wakiillada oo Tababar aqoon-korodhsi ka qayb-galay*

Waxaana tababarkan bixinayey macalin ka yimid South Africa oo mudo 24 sano ah ka tirsanaa Golaha Wakiilada South Africa, isla markaana leh aqoon durugsan oo la xidhiidha sharci dejinta. Waxaa sidoo kale macaliim ka ahaa tababarkan qaar ka mid ah xildhibaanadii hore ee Golaha Wakiilada, uga khibrada badnaa, waxaana ku jiray Mudane Cabdiqadir Jirde Ismaaciil, Cabdicasiis Maxamed Samaale, iyo Siciid Maxamed Cilmi.

Mudanasha cusub ayaa tababarkan si fiican ugu faa'iideystay mudadii sadexda cisho ahayd ee uu socdey. Waxaanu ka qabsoomay hoolka shirarka iyo aroosyada ee Maango Garden, ee magaalada Hargeisa.

- **Tababar Aqoon korodhsi oo ay qaar ka mid ah xildhibaanadu ka qaybgaleen**

19th -20th October 2021 Tababar kale oo aqoon korodhsi ayaa qaar ka mid ah xildhibaanada cusub ka qaybgaleen, waxaanu ka dhacay Maansoor hotel, Hargeisa, waxaanu socdey mudo 2 cisho ah. Tababarka ayaa waxaa soo qaban-qaabiyey Hay'adda Max Blanch oo ah hay'ad Germal ah. Tababar ayaa intuu uu socdey waxay xildhibaanadii ka qayb-galay ku barteen casharado la xidhiidha shaqada baarlamaanka iyo awooda baarlamaanka ee dastuurku siiyey, ujeeda guud ee laga lahaa tababarkan wuxuu ahaa in xildhibaanada la dhiso aqoontooda la xidhiidha fahanka shaqa baarlamaanka iyo wajibaadkooda dastuuriga ah, si ay shaqadooda ugu gudan karaan si hufan oo wanaagsan, shaqadooduna u noqoto mid midho dhal leh oo wanaagsan. Tababarkan waxaa bixinayey, sadex macalin oo mid ahaa ajaanib, labada kalena ahaayeen laba macalin oo khibrad wanaagsan u leh shaqada

baarlamaanka iyo sharci, waa mudane Rayte – oo ka tirsanaa mudanaashii hore, isla markaana ah constitutional lawyer.

- **Tababar Aqoon korodhsi oo ay ka qayb-galeen xoghaymaha Guddiyadda Golaha Wakiilada.**

**31st October 01st Nov 2021** Golaha Wakiilada oo taageero ka helaya UNDP, ayaa abaabulay tababar dhawr-cisho ah, oo xoghaymaha guddiyada Golaha Wakiiladu ka qayb-galeen. Tababarkan ayaa ujeedadiisu ahayd in la kobciyo aqoonta shaqaalaha guddiyada G.W. si ay si hufan ula shaqaynkaraan una caawin lahaayeen mudanaasha guddiyada Golaha wakiilada.

Tababar mudadii uu socdey waxay xoghaymaha guddiyada ku barteen aqoon muhiim ah, oo la xidhiidha shaqadooda, waajibaadkooda shaqo. Waxayna ka faa'iideysteen shaqaaluhu aqoontii la dhigayey mudadii aqoon-korodhsigu socdey. Aqoon korodhsigan waxaa dhigeyey macliim maxaliya oo aqoon fiican u leh shaqada maamulka iyo baarlamaankaba.

- **Aqoon korodhsi loo sameeyay Gudiyada Golaha.**

**March 5-7, 2022,** Waxa Assod Hotel ee loogu qabtay tababar ku saabsan kor u qaadista aqoonta Gudoonka Guddiyada kala duwan Golaha Wakiillada tababarkan oo soconayay mudo laba cisho ah ayaa lagu qaatay sida ay Guddiyadu u shaqeeyaan, isla markaana u gutaan waajibaadkooda shaqo ee ay Golaha u qaabilsan yihiin.




*Xubnaha Gudiyada Golaha oo ku jiraa kulan aqoon korodhsi ku saabsan sida Gudiyadu u shaqeeyaan*

Kulankaas oo uu furay Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiillada Md. Cali

Xaamud Jibriil, wuxuu ku booriyay in Xildhibaanadu ay ka faa'iidaystaan tababarka isla markaana ku dabakhaan hawl maalmeedka ay Guddiyadu qabtaan, isagoo u mahadceliyay hawl-wadeenada Golaha ee soo qaban qaabiyay tababarkan iyo xarunta (Center for SDGs) oo farsamo ahaan Golaha ugala shaqaysay qabashada tababarkan iyo Hay'adda Caalamiga ah ee IRI oo maalgaliyay qabashada tababarkan.

Intii uu socday tababarkaasi waxay Mudanayaasha Gudiyadaa iyo hawl-wadeenadoodu ku qaateen aqoon fiican oo ku dabaqi doonaan shaqadooda, sidoo kale waxa la isku waydaarsaday aragtiyo iyo aqoon dheeraad ah, waxa tababarkaas bixinayay khubaro aqoon badan u leh mawduucyada kala duwan ee lagu siinayay.

- **Tababar Aqoon korodhsi oo ay ka qayb-galeen xoghaymaha Guddiyadda**




*Xoghaymaha Gudiyada u shaqeeya oo la siiyay aqoon iyo tababar ku saabsan shaqada Gudiyada iyo siday ula shaqeeyaan*

**21 March** tababar socday mudo laba cisho ayaa loogu qabtay Xoghaymaha Gudiydda, tababarkaas ooh awl-wadeenada Gudiyada lagu siiyay aqoon dheeraada oo khuseysa shaqada ay Gudiyada u qabtaan, siday u qaban lahaayeen, waajibaadka shaqo ee saran iyo hab-raaca shaqo gudasho, waxaan Tababarkaas Golaha ka caawiyay Hay'adda Adam Smith oo ka mid ah hay'addaha Golaha la shaqeeya.

## QORSHE ISTARAATIJIYADEEDKA 5TA SANNO EE GOLAHA WAKIILLADA

Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. C/risaaq Khaliif Axmed** isago ka duulaya Qodobka 3aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada wuxuu **13 December 2021** Gudi gaar ah (ad hoc committee) u magacaabay soo diyaarinta Qorshaha 5ta Sanno ee soo socota Golaha Wakiilladu ku shaqayn doono, ka dib markuu arkay ahmiyada ay leedahay in Goluhu helo qorshe Istaraatiijiyadeed uu ku hawl galo, isla markaana loo baahan yahay in la dhamaystiro qorshaha iyo istaraatiijiyada Golaha ee shanta sanno ee soo socda (2022-2026) Gudiddaas oo ka kooban 10 Mudane iyo laba Agaasime Waaxeed.

Hadaba, Gudidaas gaarka ahi, si u gudato hawlaha iyo waajibaadka loo xilsaaray waxay kulankoodii u horeeyay yeesheen 15 January 2022 waxay ku doorteen Gudoon, iyagoo Gudiddu Gudoomiye u dooratay **Md. Mukhtaar Xasan Maydhane**, halka Md. Maxamed Xasan Siciid u dooratay Gudoomiye ku-xigeen, isla markaana waxay isla qaadatay qaabka ay u shaqaynayso, iyadoo kulankii labaad Gudiddu ku lafa-gurtay sidoo ay dardargalin lahayd qorsheheeda shaaqo.




*Gudoomiyaha Golaha oo Kulan la yeeshay Gudidda Soo diyaarinta Qorshaha 5ta Sanno ee Goluhu ku shaqayn doono*

31 January 2022 Gudiddu waxay kulankeedii u horeeyay la yeelatay **Gudoomiyaha Golaha Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed**, ugu horeyn waxay Gudiddu Gudoomiyaha la wadaagtay qorsheheeda shaqo, waxyaabaha ay maamul ahaan uga baahan yihiin Shir-gudoonka iyo guud ahaan Golaha iyo mudda ay ku qaadanayso hawshu. Gudoomiye Khaliif wuxuu dhiniciisa Gudidda ku booriyay inay dedejiyaan isla markaana Golaha u soo saaraan qorshe istaraatiijiyadeed uu ku shaqeeyo shanta sanno ee soo socota.



*Gudoomiyaha Golaha iyo Gudoomiyaha Gudidda Diyaaarinta Qorshaha 5ta sanno ee Golaha Wakiillada*

Intaas ka dib, Gudiddu waxay Guda-gashay hawleheeda shaqa, waxayna ugu horeyn Gudiddu dalbatay La-taliyayaal khibarad u leh samaynta qorshayaasha Baarlamaanada, waxaynu Gudiddu heshay laba la-taliye oo ay Hay'adda IRI ka caawisay kuwaas oo Dalka dibadiisa laga soo qaatay, labadaas la-taliye oo kala ahaa Brown Makosi iyo Ahmed Issak oo labaduba u dhashay Dalka Kenya, waxayna Gudidda ka caawiyeen soo diyaarinta qabyo-qoraalka Qorshaha shanta sanno, iyagoo muddo bil (February 2022) ah gudidda la shaqaynayay.

Gudidda oo ay weheliyaan La-taliyaasha iyo xoghaynta Goluhu waxay yeesheen kulamo is-daba joog ahaa oo lagu lafa-gurayay, laguna falanqaynayay qorshahaas waxyaabaha uu ka koobnaanayo, qaabka uu yeelanay iyo cutubyada uu ka koobnaanayo.

Gudiddu waxay labada la-taliye kala wareegtay nuqulka kowaad ee qabyo-qoraalka 27 February kulan uu goob joog ahaa **Gudoomiye ku-xigeenka 2aad Md. Cali Xaamud Jibriil**, kulankaas oo lagu soo bandhigay nuqulka qabyada ah ee qorshaha shanta sanno, iyo waxyaabaha ka dhiman sidii loo dhamaystiri lahaa, taas oo ay ugu horeyso ka qayb-galinta iyo kala tashiga qaybaha ay khusayso (stakeholder's consultation meetings), waxayna Gudidda iyo Gudoomiye ku-xigeenka 2aad u mahadnaqeen labada khabiir ee la-talinayay Gudidda.



*Gudidda Soo diyaarinta Qorshaha 5ta Sanno iyo Khubaradii iyo La-taliyayaashii kala shaqaynayay kala wareeqay nuqulka 1aad*

Intaas Gudiddu waxay gudo-gashay kulamo dhowr ah oo ay la yeelatay qaybaha kala duwan ee khuseeyo Qorshaha shanta sanno sida hay'addaha dawlada ee si toos ah Golaha ula shaqeeya, Gudiyada Golaha, Agaasaime Waaxeedyada iyo La-taliyayaasha Golaha, hay'addaha Caalamiga ah ee Golaha la shaqeeya, Ururada Bulshada, Saxaafada iyo Haweenka, si ay tallooyinkooda iyo aragtidooda u hesho, kulamadaas oo qabsoomay intii u dhaxaysay **14 March ilaa 25 March** kulamadaas oo dhamaantooda si hufan u qabsoomay waxay gudiddu ka ururisay soo jeediyo iyo fikrado wax ku ool ah kuwaas oo qabyo-qoraalka ay ku soo dartay wixii u aragtay muhiim.



*Kulamadii Gudidda Qorshaha 5ta Sanno u qabatay qaybaha kala duwan (Stakeholers consultations meetings)*

Kadib markii ay kulamadaas ka soo ururisay Guddidu xog baaxad leh, waxa ay bilowday inay is waafajiso qorshaha iyo falcelintii daneeyayaasha Golaha, kuwaasoo saamaynayey hawlaha iyo ujeedooyinkaa istaraatajiyadeed iyo qaabka loo fulinayaba. Ugu dambeyn, Gudidda Gaar ah ee Qorshaha shanta sanno loo saaray waxay soo diyaarisay oo ay gacanta ku haysaa nuqul hufan oo wax ku ool ah, kaas ay kala-fadhigan Shir-gudoonka iyo guud ahaan Golaha la wadaagi doonto.

## WAX-QABADKII QAYBTA MAAMULKA XOGHAYNTA GOLAHA

Qaybta Maamulka Golaha Wakiillada oo ah qaynta Shaqada Golaha gacanta ku haysa had iyo jeerna u heenan u adeegida Golaha iyo Mudanayaasha la soo doortay, waxay ka kooban ban tahay Xoghaye Guud, ku-xigeen Xoghaye Guud iyo Waaxyo tiradooddu tahay 14 Waaxood iyo Xafiiska La-taliyayaasha.

Waaxyaha iyo Qaybaha Xoghayntu waxay leeyihiin Hab-raacyo iyo Hagayaal ay u raacaan habka shaqada iyo fulinteeda iyo sidoo kale wada-shaqaynta qaybaha kale ee Golaha, taas oo waax kasta ama unug kasta oo qaybta maamulka xoghaynta ka mid ah u fududaynsa inay shaqadeeda u gudato habka iyo hanaanka ugu wanaagsan.

Sidoo kale, Goluhu wuxuu leeyahay Mareeg (website) ay bulshadu kala socoto Shaqada, sidoo kale laga helayo dhamaan dukumentiyada Golaha ee dhamaystirma sida Warbixintada, Shuruucda, Hadal-qoraalada iyo Minuteska, sidoo kale Goluhu wuxuu leeyahay mereego baraha bulshada ah sida Youtube Channel, Facebook Page iyo Twitter si joogto ah loogala socdo Shaqada iyo hawlaha Golaha ka socda. Mareegta iyo bogag Baraha Bulshada ee Goluhu waa:-

1. www.Somalilandparliament.net
2. Golaha Wakiilada J. Somaliland - YouTube
3. Facebook/Golaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland | Facebook

Mudadduu Golahan cusubi joogay, waxyaabaha ay qaybta Waaxda Xoghayntu oo aan halkan lagu soo koobi karrin. Hadana, waxyaabaha ugu muhiimsan ee qaybtay waxa ka mid ah:-

- Inay Xildhibaanada la soo doortay u diyaarisay oo u qaybisay Kit hordhaca oo Buugaag ah kuwaas oo ka kooban habka Xil-gudashada Shaqada Golaha, habraacyada Shaqooyinka kala duwan, Dastuurka JSL, Xeerka ugu muhiimsan sida Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka, Xeerka Maamulka Maaliyada, Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeerka Hantidhawrka Guud iyo Xeerar kale.
- Qaybta Xoghaynta Maamulka Goluhu Waxay dhamaan mudanayaasha Golaha ee Cusub ay u sameeyeen kaadhadhka aqoonsiga ID cards, iyadoo Mudane kasta oo Golaha ka mid ah la siiyay kaadhkiisii aqoonsiga ee Xubinmada Golaha Wakiilladda oo laf ah.
- **31st October 01st Nov 2021** waxa Xoghaymaha Gudiyada iyo Hadal-qoraalka loo qabtay Tababar shaqo oo socday mudo laba cisho ah, tababarkaas oo shaqaalahaas lagu tababaray shaqada Gudiyada iyo Doorka shaqo ee Xoghaymaha looga baahan yahay gaar ahaan sida loo qaado Minutes ka iyo sida Warbixinada Gudiyada loo diyaariyo, sidoo kale waxa lagu baray hab-dhaqanka iyo akhlaaqiyaadka looga baahan yahay xoghaynta Golaha.

- Si loo helo inuu Golahan Wakiillada cusub yeesho Qorshe Istaraatijiyadeed uu ku shaqeeyo muddo xilleedkiisa sanno ee soo socda **(5 years Stratigic Plan)** waxay qaybta Maamulka oo xog ogaal u ah shaqada Golaha iyo Waxyaabaha ay qaban karaan muddaasi ay soo diyaariyeen Qorshe Istaraatiijiyadees shan sanno ah oo qabyo-qoraal ah kaas oo Goluhu ka duulayo marka uu sameysanayo Qorshe Istaraatiijiyadeedkiusa 5 sanno (5 years Stratigic Plan), qobyo qoraalkaas oo diyaar ah Golalaha hadda.

## DOORKII GOLAHA WAKIILLADA EE ABAARIHII DALKA

Golaha Wakiiladu wuxu **6 February 2022** ka dooday Xaalada Abaaraha dalka, dooddaas ka dib, waxa Goluhu ka soo saaray qaaraar dhowr qodob ah ka dib markii Gudidda Hawlaha Golaha oo loo gudbiyay wixii doodda laga soo ururiyay ay naaqisheen si ay go'aan uga soo saaraan, waxayna gudiddu ka soo saartay dooddii dhowr qodob oo Gudoomiyaha Golaha Wakiillada Md. C/risaaq Khaliif Axmed Golaha ka hor akhriyay.



*Shir-gudoonka oo Madaxweynaha ku-xigeenka ku wareejinaya $50 kun oo dollar oo Goluhu kaga qayb-qaatay gurmada abaaraha*

Wuxuuna Goluhu Go'aan qaylo dhaan ah ka soo saaray Xaalada ba'an ee Abaaraha ee dalka ka jiray, waxa qodobada doodda ka soo baxay ku jiray in Goluhu taakulada dadka abaaruhu saameeyeen kaga qayb-qaato lacag qadarkeedu **$50,000 (konton kun oo dolar),** taas oo Shir-gudoonka Golaha oo Gudoomiyuhu hogaaminayo ay isla maalintii xigtay iyadoo kaash ah $50,000 ugu wareejiyeen Gudidda Abaaraha Qaranka oo Madaxweyne ku-xigeenku Gudoomiye u yahay.

Sidoo kale waxa Goluhu Baaq Gurmasho ah u diray Dawlada Dhexe, Hay'addaha Caalamiga ah iyo kuwa Wadaniga ah, Ganacsatada, Dawladaha qaadhaan bixiyayaasha ah iyo Qurbo jooga reer Somaliland inay si deg deg ah ugu gurmadaan Dadka abaaruhu saameryeen kana qayb noqdaan dedaalada dadka iyo duunyadaba loogu gurmanayo.

## MAALINTA GOLAHA IYO DADWEYNAHA OO ARDAYDA JAAMACADA LA KULMAY.

December 22 2021 wuxuu Goluhu sameeyay maalinta Dadweynaha u furan, maalintaas oo Goluhu xaruntiisa kula kulmay koox ka mid ah Ardayda Jaamacadaha dalka, waxaana loo qabtay kulan dadweyne ujeedadiisu ahayd aqoon korodhsi ardayda lagu siinayay Siduu u shaqeeyo Golaha Wakiiiladu, Maamulkiisa iyo guud ahaan xidhiidhka bulshada gaar ahaan ardayda Jaamacadaha iyo Baarlamaanku leeyahay.




*Ardayda Jaamacadaha dalka oo kulan furan iyo tababar ku saabsan shaqada Golaha lagu siiyay Xarunta Golaha*

Kulankan waxa ardayda jaamacadaha loogu sharaxay shaqada Baarlamaanka waxaanay ardaydu su'aalo kala duwan oo maskaxdooda ka guuxaysay ku waydiiyeen Mudanayaashii ka soo qayb-galay iyo maamulka Golaha, ugu horeyn kulankaas waxa furay Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Md. Cali Xaamud Jibriil, wuxuuna ardayda iyo bulshada kale ee ka soo qayb-gashay uu balan qaaday inay Gole ahaan kulamada noocan ah ay badin doonaan.

Xoghayaha Guud ee Golaha Mudane Cabdirisaaq Siciid Ayaanle, Agaasimaha Waaxda Shuruucda iyo Hadal-qoraalka Cawad Cali Maxamed iyo La-taliyaha siyaasadaha ee golaha Md Mubaarik Faarax Warsame ayaa iyaguna casharo kala

duwan oo ku saabsan shaqada iyo habraacyadiisa maamul iyo sida gudiyadu u shaqeeyaan sharaxaado dheeraada ka siiyey.

Sidoo kale waxa iyaguna Panelka u fadhiyay oo sharaxaado dheeriya siiyey markii danbena su'aalihii ardaydu waydiisay uga jawaabayayey xildhibaanada kala ah: -

1. Md.  Mustafe Axmed Cabdilaahi Khayreeye
2. Md. Axmed Nuur Guruuje
3. Md. Axmed Xasan Cali Casoowe
4. Md. Maxamed Xasan Siciid
5. Md. Siciid Maxamed Ismaaciil (Sokeeye)




*SAWRID. Maalinta Dadweynaha ee Golaha Wakiillada oo ardayda Jaamacada Dalka lagu qaabilay*

Waxa sidoo kale kulankan dadweyne ee ardayda ka soo qayb galay Xildhibaan ka tirsan Baarlamaanka dalka FINLAND oo la yidhaahdo KIMMO iyo Safiirka Somaliland u fadhiya Dalkaas Finland, wuxuuna Xildhibaanka Finladiska ah oo hadal kooban laga siiyay uu xusay in dimuqraadiyada somaliland uu aad ugu hambalyeynayo iyo sida ay Baarlmaankii la soo doortay bulshadii soo dooratay usoo horfadhiisteen ee ugaga jawaabayaan qadiyadaha ay qabaan ee faahfaahinta uga baahan yihiin.

# MUDANYAASHA GOBOLADII LAGA SOO DOORTAY KU NOQDAY

- **Xildhibaanada laga soo doortay Gobolka Saaxil:-**

Xildhibaanada Gobolka Saaxil iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda mataalaadeed ee bulshadii soo dooratay, waxay noqdeen xildhibaanadii ugu horeeyay ee iyagoo wada socda dhamaantooda Gobolkoodii dib ugu noqday.



*Lix XIldhibaan oo ka mid ah Xildhibaanada Gobolka Saaxil oo Ujeedadda kormeerkooda faah-faahinaya*

Ujeedadda safarkoodu ahaa inay xog-ogaal u noqdaan xaalada guud ee bulshada ee Gobolka sida arrimaha bulshada iyo xaaladooda nololeed. Hadaba, 10 Xildhibaan ee laga soo doorto Gobolka Saaxil waxay **Bishii October** socdaal ku tageen Gobolka, si ay ugu soo mahadnaqaan dadkii soo doortay, isla markaana u koormeeraan xogogaalna ugu noqdaan baahiyaha bulsho ee Gobolka Guud ahaan ka Jiray. Iyadda oo Xildhibaanadu taas ka duulaya waxay kormeer xog-waraysi ah ugu tageen dhammaan Hay'adaha kala duwan ee halkan hoose ku xusan:-

1. Guddoomiyaha Gobolka Saaxil.
2. Golaha Deegaanka Degmada Berbera.
3. Guddoomiyaha Waxbarshada Gobolka
4. Maamulka jaamacada badda.
5. Isuduwaha Wasaarada caafimaadka.

6. Haamaha Shidaalka.
7. Wakaalada Biyaha Berbera.
8. Ganacsatada Berbera.
9. Golaha Deegaanka Sheekh.
10. Guddoomiyaha Waxbarshada ee Degmada Sheekh.
11. Jaamacada Culuunta Beeraha iyo Xoolaha.
12. Jeelka Weyn ee Berbera.

Xildhinaanadu intii ay joogeen Gobolka waxay aad uga shaqeeyeen oo kuurgelida Baahida Deegaanka, iyagoo warbixin ka dhagaystay Maasuuliyiinta kala duwan ee Gobolka ka shaqeeya, si ay wax uga ogaadaan wixii la qabtay, wixii caqabada ee u baahan in la xaliyo iyo wixii hormar ah ee la sameeyey.



*Xildhibaanada Gobolka Saaxil oo kulamo kala duwan la qaadanaya Madaxda heer Gobolka iyo heer Degmo ee G. Saaxil*

Warbixinta Guud ee kormeerkaas, waxay xildhibaanadu la wadaagi doonaa Golewaynaha iyo shir-guddoonka, dhammaan Cidda ay khusayso sida Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee dawlada. Iyagoo oo wixii ay soo arkeen iyo waxay soo jeeninaynayaan ku soo darri doono warbixinta guud, gaar gaarna ula wadaagi doonaan meelaha ay u arkaan inay wax ka qaban karaan baahiyaha ay soo arkeen.

# SAFARADII DALKA DIBADDIISA

## ➢ Safarkii Gudidda Arrimaha Dibadda ee Dalka Kenya.

Gudidda Golaha Wakiilada u qaabilsan Arrimaha Dibada, Iskaashiga Caalamiga ah, Qorshaynta Qaranka iyo Maal-gashigu waxay Safar ugu baxday Taariikhdu markay ahayd **24/10/2021** wadanka Kenya, Safarkaas oo uu hogaaminayay Gudoomiyaha Guddidaasi, intii ay safarka ku joogtay Wadanka Kenya waxay la kulmeen Xildhibaano iyo Senator ka tirsan Baarlamanka Kenya, waxayna ka wada hadleen xidhiidhka labada dal sidii kor loogu sii qaadi lahaa iyo xidhiidhka labada Baarlamaan ee Kenya iyo Somaliland, waxay Guddidu uga warameen xaalada dalka, doorashooyinkii u qabsoomay, waxayna labada dhinac isku fahmeen xoojinta xidhiidhkii labada Baarlamaan iyo kii kooxdii Xildhibaanada Baarlamanka Kenya (caucus).



*Xubnaha Gudidda Siyaasadda Arrimaha Dibada oo Safar ku tagay Dalka Kenya*


## ➢ Safarkii Gudidda Arr. Dibada ee Gudoomiye ku-xigeenka 1aad hogaaminayay

**4/11/2021** waxa Safar shaqo ku tagay Dalka Finald Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashiga Caalamiga ah, Qorshaynta Qaranka iyo Maal-gashiga iyo Guddoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiillada **Md. Cali Xaamud Jibriil** oo hogaaminayay Gudidda, iyadooo dalkaas si weyn loogu soo dhoweeyey ka dib markay martiqaad ka heleen Xisbiga Social Democrats Party (SDP) ee Dalkaas iyo Wakiilka Somaliland ee Finland. Gudoomiye ku-xigeenka 2aad iyo Gudiddu mudadii ay ku sugnaayeen Dalkaasi waxay kulamo kala duwan la yeesheen Madaxda Dalkaas, kulankoodii kowaad waxay la qaateen Madaxweynihii hore ee Dalka Finland **Miss Tarja Halonen** oo si diiran u qaabishay Gudidda, waxaana ay ka wada hadleen xidhiidhka ay Somaliland la leedahay Finland oo ka mida wadaamada taageera geedi-socodka dimuqraadiyada Somaliland.



*Safarkii Gudoomiye ku-xigeenka Iaad iyo Xubnaha Gudidda Arrimaha Dibada ee Dalka Finland*

**Miss Halonen** ayaa kulan Gudidda u sheegtay inay in dalkeeda Finland sii wadayso dhiirigelinta hay'addaha dimuqraadiga ah ee Somaliland ee uu ka mid yahay Golahan Wakiildada ee la doortay 31 bishii May ee sanadkan. Guddoomiye ku-xigeenka iyo Xubnaha Gudidda ayaa dhankooda uga mahadceliyay Finland taageerada ay u fidiso Somaliland, waxayna u sheegay in Somaliland ay diyaar u tahay la shaqaynta beesha Caalamka.



*Gudoomiyaha ku-xigeenka Iaad oo la taagan Madaxwaynihii hore ee Dalka Finlnad iyo Madax kale*

Waxa kale oo Gudiddu intii ay safarka Dalka Finland ku jireen ay kulan la yeesheen Guddoomiye ku-xigeenka xisbiga haya talada dalka Finland **Miss Tarja Kantola** oo sidoo kale qaabilsan kaalmada dibadda iyo **Kimma Kiljunen** oo ah Guddoomiyaha Guddida Arrimaha Dibadda ee Baarlamaanka Finland waxay madaxdas kala duwan ee Dalka Finland isla qaateen sidii Somaliland looga taageeri lahaa adeegyada aass-aasiga ah.



*Xubnaha Gudidda Arri. Dibada iyo qaar ka mid ah Madaxda Dalka Finland sida Gudoomiye ku-ixgeenka Baarlamaanka Finland*

Sidoo kale Waxayna Guddidu kulamo kala duwan la yeelatay madax ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Dibadda, Hay'addaha Finnfund, iyo Finnpartnership, Gudoomiye ku-xigeenka Baarlamanka Finland, Xoghayaha Guud ee Xisbiga SDP, hay'adda International Solidarity Foundation (ISF) iyo Jaaliyadda Somaliland.

- **Wafti uu Hogaaminay Gudoomiye ku-xigeenka 2aad oo safar ugu baxay Dalka Belgium.**

**17 March 2022 Wafti** uu Hogaaminayay Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada **Md. Cali Xaamud Jibriil** aya Kulamo midho dhal leh oo ilaa kula yeeshay Xildhibaanada Baarlamaamka Midawga Yuru (Parliament European Union) ee xaruntoodu tahay Brussels, Belgium, kulankaas oo hordhac u ahaa kulamo kala duwan Xildhibaanada Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad hogaaminayo ay la yeesheen Xubnaha Baarlamaanka Midwaga Yurub, Masuulyiin kala duwan iyo hay'addo caalami ah.

- **Gudoomiye ku-xigeenka Gudida Joogtada ah oo ka qayb galay Shir Caalamiya oo Tunis ka dhacay.**

Gufoomiye kuxigeenka Gudida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha Wakiilada **Md. Axmed Xasan Cali (Casoowe**) ayaa ka qayb galay shir Caalamiya oo ka dhacay Magaalada Tunis ee Dalka Tunisia 30th 31st March 2022.

Shirka oo ay ka soo qayb galeen xildhibaano ka socday baarlamaanada Wadamada Carabta oo ay Somaliland ku jirto ayaa lagaga hadlay doorka Baarlamaanada ee horumarinta caafimaadka qoyska (hooyada iyo dhalaanka), sidii miisaaniyad ku habboon loogu qoondayn lahaa iyo sidii baarlamaanadu ugu kormeeri lahaayeen hay'adaha dowliga iyo kuwa aan dowliga ahayn ee gacanta ku haya arrimaha khuseeya caafimaadka hooyada iyo dhalaanka. Shirka waxaa kaloo ka soo qayb galay Forum of Arab Parlimantarians on Population and Development iyo hay'ado caalami ah oo ay ka mid yihiin International Planned Parenthood

Federation (IPPF) qaybta dunida Carabta iyo UNFPA. Shirkaas oo uu Xildhibaanku ku matalayay Somaliland. Waa markii ugu horraysey ee ay Soomaaliland si rasmi ah uga qayb gasho shirarka Baarlamaanada Wadamada Carabta ah.



*TUUNIS. Md. Axmed Cabdi Casoowe Gud. Ku-xigeenka Gudidda Joogtada oo ka qayb-galay Shirka Baarlamaanada Carabta*

Arrintan ayaa sii xoojinaysa Meeqaamka iyo doorka siyaasadeed ee Jamhuuriyada somaliland ka ciyaarayso fagaarayaasha Caalamiga ah, kana mid tahay xidhiidhada aadka isu soo taraya ee somaliland la yeelanayso dalalka Afrika, Carabta iyo guud ahaan dunidoo dhan

## WUFUUDIHII IYO MADAXDII KALE EE GOLAHA YIMI

Shir-gudoonka Golaha Wakiilada cusub ee la doortey **03August 2021** markii ay Xilka la wareegeen ka dibna waxaa ay kulano, bariido, hambalyo, iyo shaqaba isugu jira xafiiskoooda kula yeesheen, madax kala duwan oo ka kala socdey xafiisyo hay'addo kala duwan. Waxayna kala ahaayeen sidan:-

- **kulankii Shir-gudoonka iyo Madaxa Hay'adda UNSOM**

**10 August 2021** ayuu Gudoomiyaha Golaha Md. C/risaaq Axmed Khaliif wuxuu kulan la yeeshay madaxa **hay'adda UNSOM** ee Somaliland **Mr. Simon Strachan** oo uu ku weheliyo Ahmed Osman oo ah madaxa xuquuqal insaanka ee UNSOM xafiiskeeda Somaliland.

Kulankan oo ujeedadiisu ahayd is-barasho iyo xog-iswaydaarsi wuxuu Gudoomiyuhu is-barashada ka dib, la wadaagay madaxa Hay'adda UNSOM qorshaha Golaha Wakiiladu doonayo in uu ku talaabsado sannaddaha soo socda, kuwaas oo ay ugu mudan yihiin in Goluhu uu waajibaadkiisa dastuuriga ah u guto si hufan oo hawlkarnimo leh. Dhinaca kale Mr. Simon ayaa balan-qaadey intii suuro gal ah in ay Golaha la shaqeeyaan wixii taageero ee ay awoodaan la wadaagi doonaan mustaqbalka dhaw.




*Kulankii Shirgudoonka (Gudoomiyaha iyo ku-xigeenka 1aad) ay la yeesheen Madaxda Hay'adda UNSOM*

Sidoo kale kulankan waxaa Gudoomiyaha ku wehelinayey Gudoomiye ku-xigeenka 1aad Mudane Siciid Mire Faarax (Giire) oo dhiniciisa sheegay in Goluhu rabo in uu sameeyo hor-umar dhan kasta ah mudada ay xilka hayaan. Kulankan oo qaatay saacado waxaa uu ku soo dhamaadey is-afgarad iyo is-bogaadin, waxayna labada dhinac ku balameen wada-shaqeyn ay yeeshaan mustaqbalka.

- **Kulankii Shir-gudoonka iyo Hay'adda UNDP**

**22nd August 2021** Shir-gudoonka Golaha Wakiiladu wuxuu kulan kula yeeshay xafiiskiisa saraakiil ka socota UNDP, kulan oo ahaa is-barasho iyo mid shaqaba madaama Hay'adda UNDP ay si toos ah ula shaqayso Golaha Wakiilada, is-barasho kadib, waxaa madaxda UNDP oo uu horkacayo madaxa xafiiska Hargeisa **Mr. Samiira Hassan iyo Mascuud Cabdi**, ay shirgudoonka cusub u sharaxeen waxyaabihii ay ka caawiyeen Golaha Wakiilada intii ay la shaqeynayeen oo ahayd mudo 9 sano ah.

Ujeedadda inay u sharaxaan Shir-gudoonka cusub waxyaabihii ay Golaha kala soo shaqeeyeen ahayd in ay war-galiyaan shirgudoonka cusub iyo wax yaabaha ay UNDP ka caawiso Golaha Wakiilada, sida ay ula shaqeeyaan iyo xidhiidhka wada shaqayneed ee soo jireenka ah ee ay la leeyihiin guud ahaan Somaliland, gaar ahaan Golaha wakiilada.

- **Kulankii Shir-gudoonka iyo Saraarkiisha IRI**

**05th September 2021** Shirgudoonka cusub ayaa kulan la qaatey madax ka socda Hay'adda International Republic Institute (IRI), Kulanka oo daarnaa is-barasho iyo inay IRI ku wargaliso inay la shaqeeyaan Golaha cusub sanaddaha soo socda, isla markaana ay hadda ku hawlan yihiin inay xafiis ka furtaan Somaliland.




*Kulankii Shirgudoonka (Gudoomiyaha iyo ku-xigeenka 1aad) iyo Madaxda Hay'adda IRI*

Ugu dambeyn, wuxuu Gudoomiye khaliif dhankiisa xusey inuu Golaha Wakiilada ee uu hogaamiyaa uu doonayo inay wax badan qabtaan, isla markaana diyaar u yihiin cidkasta oo doonaysa inay la shaqeeyaan ama ka taageerta inuu Goluhu qabto shaqo badan mudada ay xilka hayaan ee ah shanta sanno.

- **Kulankii Shirgudoonka iyo Hay'adda CCF**

**23 September 2021** Gudoomiyaha Golaha Wakiilladu Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed wuxuu Xafiiskiisa kulan kula qaatay Madaxa iyo Agaasimaha fulinta ee **Hay'adda CCF** oo ka shaqaysa ilaalinta duur-joogta iyo sharciyaqaano Caalamiya kuwaas oo sheegay inay Golaha kala shaqayn doonaan samaynta xeerar iyo shuruuc lagu ilaaliyo duur-joogta iyo deegaankaba.



*Kulankii Gudoomiyaha Golauhu xafiiskiisa kula yeesahy Madaxda Hay'adda CCF*

Gudoomiyaha ayaa soo dhaweeyey madaxda Hay'adda una sheegay inay la shaqayn doonaan Gudidda Golaha u qaabilsan Deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah si ay hawlahaas u fududeeyaan mustaqbalka dhaw.

### ➢ Kulankii shirgudoonka iyo Ambassador-ka UK ee Somaliland iyo Somalia

**12th September 2021** Shir-gudoonka ayaa la kulmay Safiirka Dawlada Ingiriiska ee Somaliland iyo Somalia **Kate foster**, oo uu waheliyo madaxa xafiiska Hargeisa **Mr. Stuart brown**, kulankan oo ahaa hambalyayn Golaha Cusub iyo Shir-gudoonkiisa, is-barasho iyo bogaadin ayaa waxaa uu ka dhacay xafiiska Gudoomiyaha.

Safiirka UK ee Somaliland ayaa u hambalyeeyey doorashada dimuquraadiga ahayd ee guud ahaan ka dhacdey Somaliland ee lagu soo doortey Golaha Wakiilada ee Shanaad iyo Golayeesha deegaanka ee degmooyinka dalka, sidoo kale wuxuu hambalyeeyey doorashada shir-gudoonka iyo sida ay dawlada UK ugu faraxsan tahay, nidaamka doorashooyinka iyo dimuquraadiyada ee Somaliland, waxaanu sheegay in dawlada UK ay diyaar u tahay, inay marwalba Somaliland ka taageerto horumarka, doorashooyinka iyo Amnigaba.

Sidoo kale, Gudoomiyaha Golaha Wakiilada, ayaa dhinaciisa soo dhawayn u muujiyey safiisk UK ee Somaliland, waxaanu sheegay in uu diyaar u yahay la shaqaynta cid kasta oo Somaliland ka taageerta, dawlada wanaaga iyo dimuquraadiyada iyo dhismaha Qaranka ee socda.

## ➢ Kulankii Shir-gudoonka iyo Ambassador-ka Isutaga Emirates – UAE

Wakiilka Dawlada Imaaraadka Carabta UAE, ayaa kulan hambalyo iyo salaam ah ku soo booqday shir-gdoonka cusub, waxaanu sheegay inuu ka safiir ahaan iyo dawlada ahaanba ay ku faraxsan yihiin doorashada Somaliland qabsatey iyo amniga iyo nidaamka kala dambaynta leh ee ka jira guud Somaliland.



Kulankii Shirgudoonka (Gudoomiyaha iyo ku-xigeenka 1aad) iyo Ambassador-ka Isutaga Emirates – UAE

Gudoomiye khaliif ayaa isna dhiniciisa soo dhaweeyey sheegay inay ka Gole Wakiillo ahaan uga mahad celinayaan safiiska booqashadiisa, kana gudoomeen hanbalyada.


## ➢ Kulankii Shir-gudoonka iyo Ambassador-ka Dalka Ethiopia

Safiika dawlada Ethiopia, ayaa kulan hambalyo iyo salaam ah ugu imi shirgdoonka cusub, waxaanu sheegay inuu ka safiir ahaan iyo dawlada ahaanba ay ku faraxsan yihiin doorashada Somaliland qabsatey iyo amniga iyo kala dambaynta Somaliland dheertahay Dawaldaha Gobolka. Gudoomiye khaliif ayaa is dhiniciisa soo dhaweeyey sheegay inay ka xafiis ahaan uga mahad celinayaan safiiska booqashadiisa, kana gudoomeen hanbalyada, marka walba Somaliland ay jaarnimada fiican iyo walaltinimada labada bulsho jecelyihiin inuu sii waaro.

## ➢ Kulankii Shir-gudoonka iyo Ambassador-ka Dalka Taiwan

Safiirka dawlada Taiwan ee Somalilland ayaa booqasho ugu yimi shir-gudoonka cusub ee Golaha Wakiillada, booqashadan oo ahayd hambalyayn, bogaadin, isagoo safiirku sheegay

in isaga  iyo dawladiisa Taiwan-ba ay ku faraxsanyihiin doorashada ka dhacdey Somaliland guud ahaan ka dhacdey guud ahaan iyo doorashadii shirgudoonka Golaha. Waxayna sheegeen Taiwan inay diyaar u tahay inay Somaliland iska kaashataan dhinaca dimuquraadiyada.



Kulankii Gudoomiyuhu la yeeshay Ambassador-ka Dalka TAIWAN

Dhinaca kale, Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. C/risaaq Axmed Khaliif wuxuu si farxad iyo qadarin leh u soo dhaweeyey Safiirka Taiwan Somaliland u fadhiya, wuxuuna xusay sida ay Somaliland diyaar ugu tahay inay iskaashadan Tiawan.

- **Wafti EU-da & UK ka socda oo Kulan la yeeshay Shirgudoonka**

Wafti ka socdey wakiilada midowga Yurub iyo UK ayaa booqasho kooban ku yimi Golaha Wakiilada **25 Jan 2022,** waxayna la kulmeen Shirgudoonka Golaha iyo Xubnaha Guddida Arrimaha Dibada.

Kulankan oo si qiime leh u dhacay, waxaa Gudoomiye **Md. Cabdirisaaq Khaliif Ahmed** oo kulanka furay horeyn wuxuu si diiran ugu soo dhaweeyey waftiga wakiilada Midowyga Yurub iyo UK, isagoo Gudoomiyuhu xusey in taageeradooda ay Somaliland siiyaan gaar ahaan Golaha Wakiladaba ay ku mahadsanyihiin guud ahaan.

Intii lagu jiray kulankas Mr. Xasan Xiis oo ah la- taliyaha Arrimaha Dibada ayaa presentation

Kooban la wadaagey xubnaha ka socdey midowga Yurub iyo UK, presentation oo ahaa soo koobid guud ahaan baahiyaha Golaha iyo Meelaha uu Strategy-ga qabyada ah ee Goluhu diirada saarayo in la hagaajiyo. Iyagoo dhinacooda xubnaha ka socdey midowga Yurub iyo UK, ay Shir-gudoonka waydiiyeen su'ku saabsan meelaha mudan in ay wax ka qabanayaan mustaqbalka dhaw. Waxaa sidoo kale ay ka wada hadleen doorka Golaha Wakiilada ee ku saabsan dhamaystirka xeerarka muhiimka u ah nabada, dimuquraadiyada, Doorashooyinka iyo arrimaha bulshada.

Kulanka wuxuu ku soo dhamaadey, jawi degan oo is-afgarad. Waana markii ugu horey ee ay wafti intan miisaankiisu leegayahay Golaha Wakilada booqasho shaqo ku yimaadaan, tan iyo markii Golaha Wakiilada 5aad la soo doortay, iyadoo Xubnaha Waftigaas kala ahaayeen xubno ka kala socday Dalal kala duwan, kuwaas oo kala ahaa.

1. Maria Groeneveld (EU)
2. Adnan Ahmed (EU)
3. Johan Svensson (Sweden)
4. Wacheke Michuki (Sweden)
5. Essi Raitala (Finland)
6. Nita Syvaoja (Finland)
7. Sascha Kienzle (Germany
8. Erling Johnsen (Norway)
9. Haako Svane (Norway)
10. Morgan Riley (UK)
11. Lizzie Walker (UK)
12. Mathias Kjaer (DK)

- **Kulankii Shirgudoonka Golaha iyo Safiirka Dalka Sweden**

**05 April 2022** Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed iyo Gudoomiye kuxigeenka 1aad Golaha Md. Siciid Mire Faarax (Giire) oo ay weheliyaan Xoghayaha Guud Cabdirisaaq Siciid iyo Lataliyaha shirgudoonka iyo Agaasimaha Qorshaynta ayaa kulan la qaatay Safiirka Dalka SWEDEN **Per Lindgarde** oo uu weheliyo madaxa siyaasada Safaarada **Mr. Yahan Svensson.**




*Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku-xigeenka 1aad oo Xafiiska Gudoomiyaha kula kulmay Safiirka Dalka Sweden*

Safiirka oo ka mid ahaa Wufuud tiro badan oo dalka ku yimi safar ay ujeedadoodiisu tahay sidii ay indhaha u soo saari lahaayeen Masiibadii baaxada lahayd ee soo gaadhay Suuqa ugu weyn dalka ee WAAHEEN.

Safiirka iyo shirgudoonka ayaa xaalada suuqa waaheen ka sokow waxay ka wada hadleen Xaalada abaaraha ee dalka ka taagnayd iyo halka wax marayaan, sidoo kale waxay isla eegeen Xaalada dimuqraadiyada iyo doorashooyinka inagu soo fool leh.

Kulanka oo ay wakhti wada qaateen labada dhinac waxay ku kala qaateen xogo kala duwan, iyagoo isla meel dhigay talaabooyin ay tahay in hore loo sii qaado si wax looga qabto baahiyaha abaareed ee taagnaa, ka qayb qaadashada gurmadka Suuqa Waaheen iyo kor u qaadista Dimuqraadiyada dalka

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JLS**